



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA MAARSO 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Maarso 2023 ayaa gaaray 137.29, marka la barbardhigo 134.54 bishii Febraayo 2023.

Isbedel bileedka, Maarso 2023, marka la barbar dhigo Febraayo 2023, ayaa sare u kacay 2.05 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ahaa **Guryaha, Biyaha iyo Korontada (+3.37 boqolkiiba) Cuntada iyo Cabitaanda (+2.31 boqolkiiba)**. Sare u kaca ugu badan ee **Guryaha, Biyaha iyo Korontada** ayaa ka yimid qiimaha **Biyo gelinta iyo adeegyada yaryar (7.61 boqolkiiba)**. Sare ugu badan waxaa ka qeybqaatay **Biyo gelinta (10.73 boqolkiiba)**. Qiimo kororka **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa waxaa sababay **Cuntada (2.31 boqolkiiba)**. sare u kaca ugu badan ka yimid qiimaha **Qudaarta (+12.03 boqolkiiba)**. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Maarso 2022 iyo Maarso 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.68 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.43 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Febraayo 2022 iyo Febraayo 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maarso 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maarso 2023	
Tusaha bishan (Maarso 2023)	137.29
Tusaha bishii hore (Febraayo 2023)	134.54
Tusaha sanadkii hore (Maarso 2022)	129.92
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	2.05%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.68%

Heerka sicir bararka marka la eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 bilood

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiya, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maarso 2023

Heerka sicir-bararka bisha Maarso 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2022 iyo Maarso 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.68 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2022 iyo Maarso 2023, marka labar bardhigo 5.43 boqolkiiba 12kii bilood, Febraayo 2022 iyo Febraayo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Maarso 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 2.05 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maarso 2023.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 2.31 boqolkiiba, bishii Maarso 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.00 boqolkiiba bishii Febraayo 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 5.03 boqolkiiba bishii Maarso 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 5.41 boqolkiiba Febraayo 2022.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey sare u kac bille ah 3.37 bishii Maarso 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa ahaa 7.26 boqolkiiba bishii Maarso 2022. Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 5.49 boqolkiiba ee Febraayo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maarso 2023 (Dec 2014 = 100)

War bixin bileedka bisha **Maarso 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

TSB-da Isbedelka Bisha Sanadkan & Bisha Sanadki Hore (%)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):


- **Tubaakada** ayaa la diiwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 84.76 boqolkiiba bishii Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+118.8 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah 7.29 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay bishii Maarso 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha adeega bukaan socodka (+9.92 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 7.26 boqolkiiba bishii Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska wax lagu karsado & shidalka (+17.83 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 7.15 boqolkiiba bishii Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+11.57 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 5.03 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay Maarso 2022 iyo Maarso 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada (+6.05 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay Burka Qamadiga/sareenta oo gaaray (31.58 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac dhan 4.76 boqolkiiba Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kabaha (+4.97 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 3.46 boqolkiiba Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+8.91 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac dhan 3.11 boqolkiiba Maarso 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kabaha (+7.54 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maarso 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Maarso.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maarso 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maarso 2023 (+)

- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 4.90 bishii Maarso 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha fadhiga oo gaaray +5.21 boqolkiiba.
- **Guryaha, Kirada & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 3.37 bishii Maarso 2023. Qiima kororka ugu badan ayaa yimid qiimaha Korontada, Gaaska & shidaalka oo gaaray +7.15 boqolkiiba.
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 2.31 boqolkiiba, bishii Maarso 2023. Qiima kororka ugu badan ayaa yimid qiimaha Cuntada +2.37 boqolkiiba.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Maarso 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Maarso.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maarso 2023 ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha **Maarso 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maarso 2022 TSB	Febraayo 2022 TSB	Maarso 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	129.92	134.54	137.29	2.05	5.68
Cuntada & Cabitaanada	46.04	138.63	142.32	145.61	2.31	5.03
Tubaakadda	1.25	86.47	159.76	159.76	0.00	84.76
Dharka & Kabaha	5.03	147.53	151.47	152.13	0.44	3.11
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	119.91	124.43	128.62	3.37	7.26
Agabka Guryaha	2.93	109.53	109.38	114.74	4.90	4.76
Caafimaadka	5.00	161.16	172.91	172.91	0.00	7.29
Gaadiidka	3.77	111.13	109.16	109.51	0.32	-1.45
Isgaarsiinta	2.80	103.03	103.03	103.03	0.00	0.00
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	103.85	103.85	0.00	0.00
Tacsiinta	4.00	109.11	109.11	109.11	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.05	145.78	145.78	0.00	7.15
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.21	112.01	114.03	1.80	3.46

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Abriil, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo, 2023. Wixii faahfaahintaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maarso 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Maarso 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia